**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
Baarlamaanka Dowlad Gobaleedka Galmudug
**Xafiiska Guddoomiyaha**

جمهورية الصومال الفدرالية
مجلس التشريعي لولاية جلمدج
مكتب الرئيس

*Federal Republic of Somalia*
**Galmudug State of Parliament**
**Office of the Speaker**

**Tix:** XGBGM/0038/21 **Tar:** 31 August 2021

**Ku: Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug = Dhusamareb=**
**Og: Madaxweyne Kuxigeenka Dawlad Gobaleedka Galmudug = Dhusamareb=**
**Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare ee Dawlad Gobaleedka Galmudug = Dhusamareeb=**

**Ujeedo: Soo Gudbin Shuruuc uu Ansixiyey Golaha Sharci-dejinta DGGMMudane Madaxweyne,**

Iyada oo la tixraacayo warqadaadii sumadeedu aheyd Tix:DGG/XMKG/D0091/6/21 kuna taariikhaysneed 09/06/2021 kana timid Madaxweyne Kuxigeenka DGGM u jeed-keeduna ahaa soo gudbin Hindise Sharciyeedyo ka yimid Golaha Wasiirada si Baarlamaanku uga guto Waajibkiisa Dastuuriga ah.

Golaha Sharci-dejinta DGGM ayaa ku Ansixiyey Kalfadhigiisa 2aad ee Sanadkaan 2021, Fadhiyadiisii 19, 20, 23, 25, 26 iyo 27, Shuruucda kala ah;

1. Sharciga Kalluumeysiga Dawlad Gobaleedka Galmudug Sharci LR:005. 30 June 2021.
2. Sharciga Nidaaminta & Naqshadeynta Magaalooyinka Galmudug Sharci LR:006. 04 July 2021.
3. Sharciga Dakhliga Dawlad Gobaleedka Galmudug Sharci LR:007. 07 July 2021.
4. Sharciga Khidmadaha & Ujuurooyinka Kalluumeysiga Badda Galmudug Sharci LR:008. 11 July2021.
5. Sharciga Shirkadaha Ganacsiga Dawlad Gobaleedka Galmudug LR:009. 12 July 2021.
6. Sarciga Nootayada Dawlad Gobaleedka Galmudug LR:010. 14 July 2021.

Mudane Madaxweyne adiga oo gudanaya Waajibkaaga Dastuuriga ah waxaan kusoo gudbinaynaa 6 daan Sharci ee kor ku xusan si aad ugu meel-mariso Xeer Madaxweyne, kadibna loogu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

M.ne Dr. Maxamed Nur Gacal
Guddoomiyaha
Baarlamaanka DGGM

**E-mail.** speaker@galmudugparliament.gov.so **Website:**www.galmudugparliament.gov.so

**SHARCI Lr: 005** **Tr: 26/2/2022**

**ANSIXINTA SHARCIGA KALLUUMEYSIGA DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG:**

**MADAXWEYNAHA DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG,**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 50aad farqadda 12aad ee Dastuurka Dowlad Gobaleedka Galmudug

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 35aad Farqaddiisa 1aad ee Dastuurka Dowlad Gobaleedka Galmudug

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Guddoonka Baarlamaanka Galmudug Tix: XGBGM/0038/21 ee 31 August 2021 kuna saabsan ansixinta Sharciga Kalluumeysiga Dowlad Gobaleedka Galmudug

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida ay Galmudug u qabto Sharcigaan

**Waxa uu Madaxweynaha Dowlad Gobaleedka Galmudug soo saaray Xeerkan**:

**Qodobka 1aad:**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa la oggolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Kalluumeysiga Galmudug

**Qodobka 2aad:**

Waxaa uu Xeerkan dhaqan-gelayaa isla maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo. Laga billaabo marka la saxiixo, waxaa la baabi'yay Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Dowlad Gobaleedka Galmudug.

**Mudane, Axmed Cabdi Kaariye (Qoorqoor)**

**Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug**

**JAMHURIYADA FEDRAALKA SOOMAALIYA**

**DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG**

# Sharciga kalluumeysiga Dawlad GobaleedkaGalmudug

[Sharci LR #005/2021]

# Tusmo

**CUTUBKA 1AAD** ..... **3**
Qodobka 1aad Xigasho..... **3**
Qodobka 2aad Eray-Bixin ..... **3**
**CUTUBKA 2AAD** ..... **4**
Qodobka 3aad Mas'uuliyadda Wasaaradda..... **4**
Qodobka 4aad Mabaadii'da Maareynta Kalluumaysiga ..... **4**
Qodobka 5aad Horumarinta Kalluumaysiga..... **5**
Qodobka 6aad Maamulka Kalluumaysiga ..... **5**
Qodobka 7aad Maareynta Kalluumaysiga ..... **6**
Qodobka 8aad Macluumaadka Kalluumaysiga Iyo Akhbaaraha Faahfaahintooda..... **6**
Qodobka 9aad Cilmi-Baaris..... **6**
Qodobka 10aad Xaddidida Kalluumaysiga ..... **7**
**CUTUBKA 3AAD** ..... **7**
Qodobka 11aad diiwaan-gelinta maraakiibta kalluumaysiga ..... **7**
Qodobka 12aad heshiiska ogolaansho kalluumaysi ..... **8**
Qodobka 13aad bixinta shatiyada guud ahaan..... **8**
Qodobka 14aad kalluumeysiga iyo ogolaanshaha soo gelidda biyaha galmudug ..... **8**
Qodobka 15aad bixinta shatiga kalluumeysiga muwaadinka ..... **9**
Qodobka 16aad bixinta shatiga maraakiibta qalaad ..... **9**
Qodobka 17aad shatiga kalluumaysiga qalaad ..... **10**
Qodobka 18aad mamnuucida isdhaafsiga shatiyada ..... **10**
Qodobka 19aad Xafidaada Shatiyada..... **10**
Qodobka 20aad Isticmaalka Shatiga ..... **10**
Qodobka: 21aad Ujuurooyinka Waajibaadka Kalluumaysatada..... **10**
Qodobka 23aad Noolayaasha Badda Ee La Badbaadinayo (Noolayaasha Khatarta Ku Sugan).... **11**
Qodobka 24aad Kontoroolka Iyo Baaritaanka..... **11**
Qodobka 25aad Sarkaalka Loo Xilsaaray..... **11**
Qodobka 26aad Awooda Baaraha Loo Xilsaaray ..... **11**
**CUTUBKA 4AAD** ..... **12**
Qodobka 27aad dembiyada..... **12**
Qodobka 28aad ganaaxyada ..... **13**
Qodobka 29aad Hanti La Wareegid ..... **13**
**CUTUBKA 5AAD** ..... **14**
Qodobka 30aad xal mushkiladeedyada ..... **14**
**CUTUBKA 6 AAD** ..... **14**
Qodobka 31aad Xeerarka ..... **14**
Qodobka 32 aad Awoodda Fulinta Sharcigaan..... **14**
Qodobka 33 Dhaqangal ..... **14**

## CUTUBKA 1AAD
## Qodobka 1aad
## XIGASHO

Dukumintigaan waxaa loo xigan karaa

'Sharciga Kalluumaysiga Dawlad Gobaledka Galmudug'.

## Qodobka 2aad
## ERAY-BIXIN

Ujeeddada Sharcigaan, eray walba waxaa uu leeyahay macnaha ku hor qoran:

1. **Wasaarad**: micnaheeda waa Wasaaradda Dekadaha iyo Kalluumeysiga Galmudug.
2. Wasiir: micnihiisu waa Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo kalluumeysiga Galmudug.

1. **Biyaha Badda Galmudug:** waxaa loola jeedaa dhul badeedka ilaa 12 Mayl (territorial sea) iyo aagga ku xiga ilaa 24 Mayl (contiguous zone) kuwaas oo ay Dawlada Galmudug ku leedahay awood ay ku maamusho kana kooban inta u dhexeeysa Dinowda oo dhacda Waqooyiga xeebta Badwaynta Hindiya iyo Xasha-weyn oo dhacda koonfur bari magalaada Masagawaay ee degmada Ceeldheer.

3. **Noole Biyood:** waxaa loola jeedaa dhirta iyo xayawaanka ku nool biyaha, (marka laga reebo shimbiraha), oo ay ka mid yihiin kalluunka, qolofleyda, jamallada iyo xamaaratada ku nool biyaha dhexdooda, ukumaha qolofleyda ama naasaleyda ku nool biyaha iyo nooleyaasha kale ee sida dabiiciga ah looga helo biyaha.
4. **Kalluumaysi:** macnahiisu waa qaadashada, dabashada ama qabsashada kalluunka iyo noole biyoodyada kale nooc walba ee la qabto.
5. **Shatiga Kallumaysiga:** macnihiisu waa ruqsada la siiyo cid kasta ee codsata in ay ka kalluumaysato, ka shaqeysato, ka ganacsato ama cilmi-baaris ku sameysa wax-soo-saarka kheyraadka badda Galmudug ee buuxisa shuruudaha kalluumaysiga
6. **Markab Kalluumeysi:** macnihiisu waa huuri, doon, markab ama doomaha wax lagu raro ee loo isticmaali karo Kalluumaysiga.
7. **Bixinta Shatiga:** waa ruqsad ay Wasaaradda Dekadaha iyo Kalluumeysiga siiso codsadaha soo qorta in la siiyo Shatiga Kalluumaysiga.
8. **Baare:** macniheedu waa qofka loo xilsaaro inuu noqdo xaqiijiye ama hubiye.
9. **Mulkiile:** waxaa loola jeedaa wixii la xiriira ama khuseeya maraakiibta kalluumaysiga ee haysta shatiga iyo cid kasta oo milkiile markab ama kireyste markab ah ama kireyste gaadiid badeed ah.
10. **Ilaalinta Noolaha Badda:** waxaa loola jeedaa naasoleyda badda, noole isku-isir ah ee qatarta ku jira iyo noole biyood, kuwaas oo laga dhawrayo in la ugaarsado.
11. **Noole Bartilmaameed ah:** macnaheedu waa noolayaasha la ogol yahay in laga kalluumaysto oo shatiga loo bixiyey.

12. **Loogga Markabka:** macnahiisu waa buugga loo yaqaan (Log) ee markabka looga baahan yahay waana in lagu xafido markabka gudihiisa kaas oo haysta shatiga.
13. **Calanka Qaranka:** waxaa loola jeedaa calanka qaranka markabka laga aqoonsaday in uu ka diiwaan-gashanyahay taas oo waafaqsan sharciyada caalamiga ah.
14. **Markab Kalluumaysi Qalaad:** waxaa loola jeedaa markab kasta ee loo isticmaalo kalluumaysi ama looga shaqeysto dhaqaale ama cilmi-baaris kheyraad badeed ee qalaad.
15. **Qabasho:** macnaheedu waa kheyraadka lagu qabtay qalabka Kalluumaysiga sida qalabka shabaqa lagu jiido, maqaalinta iyo qalabka shabag wareega.
16. **Qabasho–dhacdo:** macnaheedu waa noole kasta oo loo qabto si dhacdo ah iyo kuwa bartilmaameedka ahba.
17. **Dhulka Dejinta:** waxaa loola jeedaa waxyaabaha la soo qabtay oo dhulka lagu soo dejiyo.
18. **Keydinta & Dejinta:** waxaa loola jeedaa qalabka kalluumaysiga ee lagu keydiyo gudaha markabka, lagana qaado meesha lagu isticmaalo caadi ahaan marka la kalluumaysanayo.

## CUTUBKA 2AAD

### Qodobka 3 aad

### Mas'uuliyadda Wasaaradda

1. Wasaaraddu waxa ay mas'uul ka tahay maareynta iyo horumarinta kheyraadka badda Galmudug iyo meelmarinta Sharcigaan.
2. Wasaaraddu waxa ay ururinaysaa macluumaadka kheyraadka badaha iyo xogta kale ee la xiriirta kalluumeysiga, isku duwidda, maareynta iyo daabicidda xogta khuseysa dhaqdhaqaaqa kalluumeysiga Galmudug iyo badbaadinta kheyraaddka.
3. Wasaaraddu waxaa kale oo ay mas'uul ka tahay horumarinta dhaqdhaqaaqa kalluumeysiga Galmudug, waxa ayna kordhin doontaa horumarinta dhaqdhaqaaqa kalluumeysiga maxalliga ah iyo kan casriga ahba iyo dhammaan waxyaabaha kale ee la xiriira sida: maalgashiyada qalaad (foreign investments), ka faa'iidaysiga shacabka ku nool Xeebaha Galmudug.

### Qodobka 4aad

### Mabaadii'da Maareynta Kalluumaysiga

1. Wasaaraddu waxa ay hubinaysaa in noole-biyoodka iyo kheyraadka xeebaha Dawlad Goballeedka Galmudug si habboon loo dhawro loona maamulo sida:

    b) In la hubiyo in kheyraadka nool aan halis la gelin lana dhawro iyaga iyo deegaankoodaba iyada oo laga faa'iidysanayo.

    t) In la hubiyo in kheyraadkaasi ay abuuraan wax-soo-saar habboon oo joogta ah, iyada oo la tixgelinayo bay'ada ku habboon dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.

2. Wasaaraddu waxa ay xaqiijinaysaa in ka-qeyb-qaadashada qaramada kale ee kheyraadka nool ee ku jira biyaha Galmudug si hab-sami ah loo kontoroolo ama loo maareeyo si loo hubiyo ka faa'iideysiga wadajirka ah ee kheyraadka, gaar ahaan maraakiibta waddaniga ah iyo

maraakiibta kalluumaysiga shisheeye labaduba in aysan ka saro marin guud ahaan inta loo ogol-yahay in ay qabtaan ee kheyraadkaas waqtiga ay Wasaaraddu u ogolaatay iyada oo la tixgelinayo cilmiga ugu habboon ee Wasaaraddu haysato iyo arrimaha kale ee khuseeya oo ay ka mid tahay dhibaatada dalagu u geysto noolaha ay ku tiirsan yihiin.

3. Wasaaraddu waxa ay horumarinaysaa siyaasadda Kalluumaysiga Badda, webiyada, biyo qabatinada iyo qorshaha saldhig u noqonaya Sharcigaan.

## Qodobka 5aad
## Horumarinta Kalluumaysiga

1. Wasaaraddu waxa ay wada-shaqeyn iyo wada tashi la sameynaysaa hay'adaha dawliga ah, kuwa aan dawliga ahayn iyo waaxyaha kale ee Dawlad Goballedka Galmudug si ay u horumariso Kalluumaysiga xeebaha, warshadaha iyo waxyaabaha kale ee la xiriira warshadeyntooda iyada oo la qaadayo tallaabooyinka soo socda:

   b) Bixinta shaqo-fulinta adeegga tababarada;
   t) Qabashada cilmi-baarisyo;
   j) Kor-u-qaadista wada-shaqeynta u dhexeysa Wasaaradda iyo Kalluumaysatada;
   x) Kor-u-qaadida suuqyada wax-soo-saarka kheyraadka badda;
   Kh) Bixinta qalabka kaabiyaasha; iyo
   c) Kor-u-qaadidda xirfadaha kalluumaysiga iyo abuuristoodaba.

## Qodobka 6aad
## Maamulka Kalluumaysiga

1. Wasaaraddu waxa ay diyaarinaysaa ama keydinaysaa qorshaha maamulka iyo horumarinta kalluumaysiga biyaha Dawlad Goballeedka Galmudug iyada oo ku saleynaysa barnaamijka horumarinta kalluumaysiga ee qorshayaashaas.
2. Qorshe waliba waa in uu:
   b) Caddeeyo Kheyraad-baarista ee kalluumaysi iyo qiimeynta xaaladda waqtigan uu ku sugan yahay ka-faa'ideysigiisu;
   t) In uu caddeeyo ujeeddooyinka la rabo in laga gaaro maareynta kalluumaysiga;iyo
   j) In uu caddeeyo barnaamijka shati-bixinta ee Kalluumaysi iyo qiimeynta xaaladda waqtigaan uu ku sugan yahay ka-faa'ideysigiisu.
3. In la diyaariyo maareynta Kalluumaysi kasta iyo qorshaha horumarintiisa sida:
   b) in la tixgeliyo lana hago mabaadii'da lagu xusay qodobka 3 aad ee Sharcigaan;
   t) in lala tashado dadka ku-hawlan kalluumaysiga, Dawladdaha Hoose iyo cid kasta oo uu khuseeyo qorshaha dawlad Gobaleedku; iyo
   j) in la soo bandhigo qorshe qabyo ah ee khuseeya maareynta kalluumaysiga ee dhammaan degmooyinka xeebaha gobollada.
4. Wasaaradu waxa ay la tashi la samaynaysaa cid kasta oo suuragal ah sida, Dawlada Federaalka Soomaliya, Wasaaradaha Kaluumaysiga Maamul Gobaleedyada guud ahaan iyo gaar ahaan kuwa aan wadaagno soohdimaha, iyada oo aragtida laga leeyahay ay tahay is waafajin iyo sidii horukac loogu samayn lahaa maaraynta kalluumaysiga.

5. Wasaaraddu waxa ay soo saaraysaa war-side (journal) ama website si joogto ah loogu soo qoro qorsheyaasha iyo akhbaaraadka rasmiga ah oo kooban.

**Qodobka 7aad**

**Maareynta Kalluumaysiga**

1. Wasaaraddu waxa ay dejinaysaa xeerar lagu hago maareynta ugu habboon kalluumaysiga.
2. Tallaabooyinka loo dejiyey maareynta kalluumaysiga waxaa ku jira oo aan ku koobnayn:
   b) Xilli xirid meelaha loo xadiday noocyada Kalluumaysiga ama xaddidid hababka markabka loogu kalluumaysto; iyo
   t) Xadidid hababka iyo qalabka oo uu ku jiro isha cabbirkeeda, sifooyinka kale iyo noocyada lagu soo dejin karo iyo ka ganacsigooda.
3. Nidaaminta iyo dejinta kalluunka iyo maamul u sameynta meelaha lagu dejiyo.
4. Kontoroolka, wax-soo-saarka, kalluumeysiga ama ka soo saarista xayawaanka noole biyood kasta iyo dhirta ka timaada biyaha laga kalluumaysto ee Galmudug.
5. Wasaaraddu waxa ay nidaaminaysaa isla markaana dejinaysaa talaabooyin iyo maareyn mamnuucaysa haysashada iyo soo-iibinta qalab kasta ee kalluun ama noole biyood kale haddii uusan haysan ruqsad ay Wasaaraddu bixisay.

**Qodobka 8aad**

**Macluumaadka Kalluumaysiga Iyo Faahfaahintooda**

1. Wasaaraddu waxa ay ururinaysaa tiro-koobka macluumaadka iyo maareynta akhbaaraha dadweynaha ee khuseeya dhaqdhaqaaqyada kalluumaysiga Galmudug.
2. Wasaaraddu waxa ay samaynaysaa faaqidaad iyo soo-saarid tiro-koob iyo akhbaaro kale ee kalluumaysi.
3. Wasaaraddu waxa ay ka dalbanaysaa cid kasta oo ku hawlan kalluumaysiga iyo dhaqdhaqaaqyadda la xiriira in ay u soo gudbiyaan macluumaadka khuseeya shaqooyinkooda sida ugu haboon sarkaalka loo xilsaaray.
4. Wasaaraddu waxa ay la-tashi iyo iskaashi la samaynaysaa laamaha, maamulada kalluumaysi ee Goballada kale iyada oo laga eegayo is-waafajinta iyo hagida tallaabooyinka maareynta iyo akhbaaro isdhaafsiga kalluumaysiga.

**Qodobka 9aad**

**Cilmi-Baaris**

1. Markabka laguma isticmaali karo gudaha biyaha Dawlad Gobaleedka Galmudug cilmi-baaris la xiriirta Kheyraadka nool marka laga reebo ogolaanshaha Wasaaradda ee qodobka 12 aad ama iyada oo la tixgelinayo shatiga kalluumaysiga uu haysto.
2. Wasaaraddu waxa ay u ogolaan kartaa ruqsad qoraal ah, cid kasta ama markab in uu kalluumaysto isaga oo ujeeddadiisu tahay in uu sameeyo aqoon-baaris cilmiyeysan

isaga oo dhawraya xaaladaha ay Wasaaraddu u dejisay, isla markaana laga qayb gelinayo aqoon yahanno Soomaaliyeed markii aysan ku caddeyn Sharcigaan.

3. Wasaaraddu waxa ay gacan-siinaysaa isla markaasna dhiiri-gelinaysaa awoodda cilmi-barista muwaadiniinta Soomaaliyeed si loo gaaro wax-soo-saar sarreeya.

## Qodobka 10aad
## Xaddidida Kalluumaysiga

Meelaha looga baahan yahay xaddidaada maareynta ku habboon ee cadadka dadka, maraakiibta, shabaagadaha ama xaaladaha kale ee looga shaqeeyo kalluumaysiga, Wasaaraddu waxa ay ogeysiin ku bixinaysaa wargeyska rasmiga ah ee Wasaaradda iyo waxyaabaha kale ee wararka lagu baahiyo meelaha xaddidaadaas laga doonayo, sida:

b) Fasax-bixin ama shatiyo cusub;
t) Ku khasbid shati gaar ah ama cashuur bixin; iyo
j) Kala fadilid shati bixin ee kalluumaysiga kale.

## CUTUBKA 3AAD
## Qodobka 11aad
## Diiwaan-Gelinta Maraakiibta Kalluumaysiga

1. Wasaaraddu waxa ay siinaysaa shati kalluumaysi maraakiib ka kalluumeysata biyo-badeedka Dawlada Gobaleedka Galmudug.
2. Wasaaraddu waxa ay siinaysaa codsadayaasha shatiga kalluumaysiga ay u baahan yihiin, iyaga oo heli doona diiwaan-galin maraakiibtooda oo ansax ah.
3. Cidna ma isticmaali karto markab in uu ka kalluumaysto biyaha Galmudug isaga oo aan haysan shahaadada ruqsadda diiwaan-gelinta markabka oo ansax ah.
4. Shahaadada diiwaan-gelinta ee habsamida loo bixiyey waxaa loo isticmaali karaa bixinta lacagaha cashuuraha loo fasaxay milkiilaha ama markabka.
5. Cid kasta oo isticmaasha markab si ay uga kalluumaysato biyaha Galmudug iyada oo aan haysan shati diiwaangashan ee markabkeeda oo ansax ah, waxaa uuna noqon doonaa eedaysane la horgeeyo sharciga Dawlad Gobaleedka Galmudug u yaal si loogu qaado fal-dembiyeedka uu galay.
6. Arjiga shahaadada kalluumaysiga waa qoraal, waxaana si kooban loogu muujiyaa arrimaha soo socota:

b) Magaca, faah-faahinta markabka, calanka iyo dalka uu ka diiwaangashan yahay;
t) Magaca Milkiilaha, kireystaha, haddii uu jiro kabtanka/naaquudaha markabka;
j) Cinwaanka mulkiilah ma kireystaha
x) Dhererka iyo Ballaca Markabka
kh) Goobta lagu dhisay iyo waqtiga
d) Miissankiisa celcelis ahaan iyo Miisaankiisa dhabta ah
r) Awooda Matoorka saran iyo noociisa
Sh) Tirada shaqaalaha iyo dhalashooyinkooda

Dh) Diiwaanka qorista wax-soosaarka waa inuu saran yahay markabka

c) Calaamooyinka loogu yeero, qalabka badda lagu maro iyo kaabayaasha ku rakiban gudaha markabka;

g) Faahfaahinta hawlaha kalluumaysi ee uu soo dalbaday iyo saxiixa codsadaha;

f) Nooca kalluumaysiga la rabo in laga kalluumaysto;

q) Muujin sida ama qaabka loo kalluumaysto;

k) Hababka kalluumaysiga iyo qalabka;

l) Hababka wax-soo-saarka ee la adeegsanayo, faahfaahinta suuqgeynta, meesha ugu dambeysa ee la geynayo wax-soo-saarka iyo isticmaalka wixii la soo saaray; iyo Faahfaahin meesha laga kalluumaysanayo;

m) Tirada kalluunka ama noole-biyoodyada kale ee la qabanayo;

n) Waqtiga shatiga uu ansax yahay (validity of licence);

w) In la qeexo kaaliye-yaasha horjoogaha maamulka (kabtanka), magacyadooda iyo shahaadooyinka ay haystaan; iyo wadamada ay u dhasheen;

h) In ay u soo gudbiyaan Wasaaradda "Akhbaar kasta ee la soo codsado".

y) Waa in uu xafiis ku leeyahay gudaha Dawlad Goboleedka Galmudug

## Qodobka 12aad

## Heshiiska Ogolaansho Kalluumaysi

1. Wasaaraddu waxa ay samaynaysaa wadatashiyo haddii loo baahdo, waxa ayna heshiisyo la geli kartaa Shirkado iyo hay'ado caalami ah oo dawladuhu u-xil-saarteen awoodda ka wada-hadalka heshiisyada kalluumaysi.
2. Xaddiga kallumeysiga lagu galo heshiiskaan kama badsan karaan maraakiibta kallumeysiga ee ajnabiga ah.
3. Heshiis walba oo lagu galo qodobkaan waxa lagu darayaa mas'uuliyadda saaran maraakiibta ama hey'adaha kallumeysiga ee ajnabiga ah in ay kasoo baxaan wixii shuruudo ah ee lagu galo heshiis.

## Qodobka 13aad

## Bixinta Shatiyada Guud Ahaan

1- Iyada oo aan la kala soocin waxaa shati kaluumaysi la siin karaa cid kasta oo buuxisa shuruudaha Sharcigaan u degsan.

2- Kallumaysatada Soomaaliyeed ee Galmudug waxa ay yeelan doonaan mudnaan gaar ah ee ogolaanshaha kalluumaysiga iyo shati siintaba.

## Qodobka 14aad

### Ogolaanshaha Kalluumeysiga Iyo Soo Gelidda Biyaha Galmudug

1. Markab qalaad waa in uusan ka kalluumaysan iskuna dayin in uu ka kalluumaysto ama uu ka qeyb-galo shaqooyin kalluumaysi gudaha biyaha Galmudug isaga oo aan haysan shatiga ansaxa ah ee ku soo baxay Sharcigaan.

2. Markab kasta ee kalluumaysi ee soo gala biyaha Galmudug isaga oo aan haysan shati ansax ah, waa in la horgeeyaa Maxkamadaha Garsoorka si loogu qaado sharciga u degsan kalluumaysiga Galmudug.
3. Markab kasta ee kalluumeysi oo soo gala biyaha Galmudug ayna ku caddaato in uu jebiyey qodobka 10aad ee Sharcigaan, waxaa uu noqonayaa dambiile lagu fuliyo Sharcigaan.

4. Dhamaan maraakiibta kalluumaysiga qalaad ee doonaya xuquuqda ka hawl-galka gudaha biyaha Galmudug waxa ay u baahan yihiin ruqsad-siintaan oo ay ka helaan Wasaarada Dekadaha iyo Kalluumeysiga.

## Qodobka 15aad

## Bixinta Shatiga Kalluumeysiga Muwaadinka

1. Waxaa laga dhaafay shatiga kalluumeysiga in la siiyo noocyada doonyaha soo socda:
   A. Kuwa matoor la'aanta ah;
   B. Kuwa Matoorka leh balse dhererkoodu dhaafsiisneyn afar mitir; ama
   C. Kuwa Loo isticmaalo kalluumeysi madadaalo keliya.
2. Codsade kasta oo wadani ah ee doonaya shati markab kalluumaysi waa in uu arji qoraal ah u soo gudbiyaa Agaasimaha guud, waana in ay ku jiraan akhbaaraha ku tilmaaman Sharcigaan (Foomka shatiyada).
3. Muwaadin kasta ee doonaya shatiga markab kalluumeysi qalaad, waa in uu u hoggaansan yahay xaladaha la doonayo in ay waafaqaan iyaga oo adeegsanaya talaabadda maareyntooda iyo lacag bixinta u degsan (lacagta la siiyo Dawlad Gobaleedka ama lacagaha dul-saarka ah).

## Qodobka 16aad

## Bixinta Shatiga Maraakiibta Qalaad

1. Codsadaha shatiga ee markabkiibta kalluumaysiga qalaad waa in uu arjigiisa oo qoraal ah u keeno Wasaaradda sida ku qoran dukumintiga warbixinta lagu buuxiyo (foom).
2. Wasaaraddu waxa ay bixin kartaa shatiga maraakiibta kalluumeysiga qalaad markii:
   b) Ay go'aansato in ay jiraan kheyraad kalluumaysi oo dheeri ka ah shaqooyinka kalluumaysiga u-gaarka ah Soomaalida; iyo
   t) Marka ay go'aansato in tirada dheeriga ah ee laga kalluumeysan karo iyo tusmoooyinka cadad ahaan ay ku xiran tahay bixinta shatiga.
3. Shatiga markabka kalluumaysiga qalaad waa in uu u hogaansan yahay shuruudaha shati qaadashada ee Sharcigaan ku tilmaaman.

## Qodobka 17aad

## Shatiga Kalluumaysiga Qalaad

Shati kalluumaysi ee lagu bixiyey Sharcugaan waa in uu ahaadaa ansax muddo aan ka badnayn hal sano.

## Qodobka 18aad

## Mamnuucida Isdhaafsiga Shatiyada

Waa in shatiga kalluumaysi ee lagu bixiyey Sharcigaan aan loo gudbin ruux labaad haddii aysan jirin ogolaansho Wasaaradda Dekadaha iyo Kalluumeysiga.

## Qodobka 19aad

## Xafidaada Shatiyada

Shatiga kalluumaysiga waa in lagu xafido gudaha markabka Kalluumaysiga ee leh ruqsada, waana in laga heli karo marka uu weydiisto sarkaalka loo xilsaaray.

## Qodobka 20aad

## Isticmaalka Shatiga

Isticmaal kasta ee shatiga kalluumaysiga ee hoos yimaada Sharcigaan, waa in laga helaa habka iyo hannaanka Sharcigani u dejiyey.

## Qodobka: 21aad

## Ujuurooyinka

1. Ujuurooyinka (fees or charges) laga bixinayo ee la xiriira muwaadinka doonaya shati markab kalluumeysi waa la daabacayaa, waxaana go’aaminaya Wasaarada waxaana wareegto kusoo saaraya Wasiirka, iyada oo loo qaybinayo dhammaan inta haysata shatiyada xiligan la joogo iyo qaybaha kale ee ay khusayso.
2. Markab wadani waa in uusan kalluumaysan haddii aan laga saamixin qodobka 12aad ee Sharcigaan.
3. Wasaaraddu waxa ay ka saamixi kartaa cidii mutaysata oo leh maraakiib kallumeysi oo wadani ah waxyaabaha uu ka doonayo Sharcigaan, taas oo ku xiran xaaladaha Wasaaraddu soo jideysay.
4. Arji Shati ku habboon kadib marka ay jirto duruufo jira awgeed, iyada oo la tixgelinayo maraakiibta kalluumaysi ee wadaniga ah marka sarkaalka shatiyada bixiya uu si macquul ah ugu qanco, waa laga saamixi karaa ujuurooyinka ku baaqday.

## Qodobka 22 aad

## Waajibaadka Kalluumaysatada

Cid kasta ee la siiyey shati kalluumaysi waxaa waajib ku ah in:

b) Ay u hogaansanaato sharciyada dalka iyo Sharcigaan;

t) Ayna u Soo gudbiso Wasaaradda warbixin joogto ah ee shaqooyinka Kalluumaysiga ay ku hawlan tahay, caddadka iyo noocyada noole-baddeed ee lagu qabto si lama filaan ah.

## Qodobka 23aad

## Noolayaasha Badda Ee La Badbaadinayo

## (Noolayaasha Khatarta Ku Sugan)

1. Waa in aysan cidna ka kalluumaysan nooleyaasha khatarta ku sugan ee gudaha biyaha Galmudug.
2. Nooleyaasha khatarta ku sugan ee lagu qabto si lama-filaan ah waa in la sii daayo isla markaana lagu celiyo biyaha badda.
3. Marka laga reebo qoraal ogolaasho ee Wasaaradda, cidna ma qaadan karto ama ma burburin karto dhagaxa quruxda badan ee jamalada badda (Coral reefs), geedaha xeebta oo biyaha badda ku nool (Mangroove trees) iyo qolof baddeedyada.

## Qodobka 24aad

## Kontoroolka Iyo Baaritaanka

1. Cid kasta oo ku hawlan shaqooyinka kalluumaysiga waa in ay u hogaansantaa in la baaro ama la kormeero mar kasta oo loo baahdo, Baaritaanka iyo kormeerka waxaa fulinaya cidii ay u xilsaarto Wasaaradda Dekadaha iyo Kalluumeysiga.
2. Cid kasta ee ku xad-gudubta hannaanka u degsan Sharcigaan waa in loo kaxeeyo dekeda ugu dhaw ee gobalka.
3. Markab ama cid kasta oo dembi ku gasha gudaha biyaha Galmudug, shati iyo shati la'aan una gudubta xadka maamulada kale, waa la xukumayaa iyada oo maqan, iyada oo la tixgelinayo sharciyada caalamiga ah.

## Qodobka 25aad

## Sarkaalka Loo Xilsaaray

Wasaaraddu waxa ay u xilsaari doontaa muwaadin ka tirsan wasaarada in u noqdo sarkaal u xilsaaran fulinta Sharcigaan.

## Qodobka 26aad

## Awooda Baaraha Loo Xilsaaray

1. Baare kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu baaro meel kasta ee lagu tuhmayo in lagu hayo kalluun ama kheyraad kale oo lagu keenay si aan waafaqsaneyn Sharcigaan.
2. Baaruhu waxa uu xaq u leeyahay in u baaro meelaha Kalluunka lagu abuurayo, diyaarinayo, hagaajinayo ama lagu keydinayo.
3. Baaruhu waxaa uu xaq u leeyahay in uu qaado muunad (Sample) kheyraadka uu ku hawlan-yahay.

4. Kalluun kasta oo aan ku habboonayn in dadku cuno ama jiran ama si kale cudur faafa u leh, si toos ah ayaa loola wareegayaa.
5. Baaruhu waxaa uu awood u leeyahay in uu joojiyo isla markaana dul-fuulo markab kasta ee ku jira gudaha biyaha Galmudug, si uu u hubiyo xamuulkiisa, kalluunka iyo qalabkiisa.
6. Cid kasta ee lagu caddeeyo xad-gudub (dembi) waa in la hor-keeno Maxkamad Garsoor sida ugu dhaqsaha badan.
7. Sarkaal kasta oo loo xilsaaro baarid waa in uu wataa aqoonsi buuxa, islamarkaana uu soo saaraa markii la weydiisto ama loo baahdo aqoonsigiisa.

**CUTUBKA 4AAD**

**Qodobka 27aad**

**Dembiyada**

Shaqaalaha iyo naaquudaha markab kasta oo ku xad-gudba waxyaabaha la mamnuucay iyo qodobada kale ee hoos ku qoran waa denbiile waxaana laga qaadayaa talaabooyinka soo socda:

1. Shaqaalaha ama naaqudaha markab kasta oo dembi ku geysta gudaha biyaha Galmudug waxaa la horgeynayaa maxkamad.
2. Qofkasta oo dembi ku gala gudaha biyaha Galmudug (ajnebi ama waddani) waxaa la hor-geynayaa maxkmad si loogu qaado fal-dembiyeedka uu galay.
3. Qof kasta oo isticmaalaya walxaha qarxa, sunta wax-suuxisa ama awood tirta kalluunka iyo noole-biyoodyada kale waxaa la horgeynayaa maxkamada awoodda u leh.
4. Kalluumayste kasta oo ka horyimaada awaamirta Maamulka Wasaaradda ee ku xusan Sharcigaan, waxa la horgeynayaa maxkamad.
5. Kalluumaysatada ugaarsada ama dhibaateeya naasoley-badeedda ama nooleyaasha kale ee khatarta ku sugan, waxaa la horgeynayaa maxkamad.
6. Qofkii dhoofiya ama burburiya dhagaxda quruxda badan leh ee jamalada badda (corals), dhirta ka baxda xeebaha badda soo gaarto (mangrove tree) ama qolofley badeedka (shell) oo aan ruqsad qoraal ah ka haysan Wasaaradda, waxaa la horgeynayaa maxkamad.
7. Markab kasta oo aan haysan shatiga loo baahan yahay ama aan ka diiwaan-gashaneyn Wasaaradda, waxaa la horgeynayaa maxkamad.
8. Ciddii diida wurarka iyo akhbaaraadka looga baahan yahay ama marin habaabisa saraakiisha Wasaaradda, waxaa la horgeynayaa maxkamad.
9. Ciidi wax ka badasha ama si kale u isticmaasha shahaadada ama leesanka la siiyay, waxaa la horgeynaa maxkamad.
10. Markabkii ama diyaaradii gasha dembi ah wasakheyn ka timid haraaga warshadaha ama nukliyarka (industrial/nuclear waste dumps) kuwaas oo lagu shubo biyaha badda Galmudug waxaa la horgeyn doonaa maxkamad si loogu qaado xad-gudubkooda.

## Qodobka 28aad
## Ganaaxyada

1. Qofka lagu helo in uu galay fal-dembiyeed la xiriira qoddobka 27aad (1) waxaa lagu ganaaxayaa laga bilaabo US $50,000 – $500,000 (konton kun ilaa shan boqol oo kun oo dollar).
2. Sida ku cad qodobka 11aad (3 iyo 5), ciddii ay caddaato in uu galay fal-dembiyeedkaas, waxaa uu mutaysan doonaa ganaax u dhaxeeya: US $ 50,000 -$100,000 (konton kun ilaa boqol kun oo dollar).
3. Qofkii lagu qabto isaga oo isticmaalaya maadooyinka qarxa, qalabka ka-reeban kalluumaysiga, kalluumaysanaya xiliga bad-xiranka, burburiya jamal-badeedka ama dhir-badeedka xeebta ama qolof-badeedka waxaa lagu ganaaxayaa US $ 500,000-$5,000,000 (Shan boqol oo kun ilaa shan milyan oo doollar).
4. Qofkii gala dembiga ku cad qodobka 27aad (2 ilaa 8) waxaa lagu xukumayaa ganaax u dhexeeya US $ 100.000 – $500.000 (boqol Kun ilaa shan boqol oo kun oo dollar).
5. Qofkii ama shirkadii gasha dembiga ku cad qodobka 27aad (9) waxaa lagu xukumayaa Ganaax u dhaxeeya US $ 100,000,000-$500,000,000 (Boqol Milyan ilaa shan boqol oo milyan oo Dollar) iyo Kharashka sifaynta deegaanka waxyeelada gaareen.
6. Ganaaxyada doomaha yaryar (sida huuriyada) ee ku xadguduba Xeerka Kalluumaysiga Galmudug waxaa lagu ganaaxayaa sida soo socta:
   - b) Ganaax US$ 200 – $400 (labo ilaa afar boqol oo doollar) ee doomaha yaryar oo matoor La'aanta ah.
   - t) Ganaax US$ 700 – $1,000 (todobo boqol ilaa kun doollar) doon-yar (huuri) matoor leh gaaraya 6 – 30 Horsepower (HP).
   - J) Ganaax US $1,100 – $1,500 (kun iyo boqol ilaa kun iyo shan boqol oo doollar) doon-yar (huuri) matoor leh gaaraya 31 – 60 Horsepower (HP).
   - x) Ganaax US$ 1,000,000 – $10,000,000 (hal ilaa toban milyan oo doollar) doomaha waaweyn ee leh matoor gaaraya 101 Horsepower (HP) iyo ka badan.
   - Kh) Halka dembigu uu aad halis u yahay ama dembiiluhu uu galo mar kale isku dembi arrinta waxaa la horgeynayaa maxkamada awooda u leh.
   - d) Qofkii isagu diida in uu keeno warbixinta la doonayo ama fulin waaya Sharcigaan waxaa lagu ganaaxayaa US $1,000 – 5,000 (kun ilaa shan kun doollar).
   - r) Qofkii gudan waaya waajibaadka ka saran shuruudaha Sharcigaan iyo xaaladaha heshiiska la kala galay, waxaa suurtagal ah in shatigiisa lagala noqdo ama la tir-tiro

## Qodobka 29aad

## Hanti La Wareegid

1. Cid kasta ee gasha dembi culus, markii maxkamadi xukunto, markabka iyo qalabka uu dembiga ku galay waa lagala wareegayaa.
2. Kalluunka iyo noole-biyoodyada oo dhan ee laga helo dusha markabka waa lagala wareegayaa
3. Dambiyada hoos yimaada Sharcigaan waxa ay hoos tegayaan maxkamad Galmudug oo awood u leh qaadida dacwadahaas.

## CUTUBKA 5AAD

### Qodobka 30aad

### Xal Mushkiladeedyada

Haddii uusan dembigu ahayn mid keeni kara ganaax adag Wasaaaradda ayaa wada-hadal xal ah ku dhamaynaysa.

## CUTUBKA 6 AAD

### Qodobka 31aad

### Xeerarka

Wasiirka ayaa sameynaya Xeerarka la xirira maareynta iyo hawlaha horumarinta kallumeysiga

### Qodobka 32 aad

### Awoodda Fulinta Sharcigaan

Ciidamada ilaalada Badda Galmudug ayaa leh awoodda fulinta Sharcigaan.

### Qodobka 33

### Dhaqangal

Sharcigaan Kalluumaysigu waxa uu dhaqan-gal noqonayaa marka uu ansixiyo Barlamaanka Dawlad Gobaleedka Galmudug, uuna saxiixo, dikereetana ku soo saaro Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Galmudug, kuna soo baxo Faafinta Rasmiga ah.